



Euroopan unionin
osarahoittama



Picture: RosZie / Pixabay

Ku soo dhawoow xannaanada carruurta!

Tervetuloa päiväkotiin! (somali)



Xannanada carruurta iyo waaxda horumarinta caruurnimada

Xannanada carruurta iyo waaxda horumarinta caruurnimada

Finland waa caadi in ilmaha uu xannanada aado ka hor inta uusan iskuul bilaabin. Hawlaha xannanada waxaa loo yaqaan daryeelka iyo barbaarinta hore. Dhammaan carruurta Finland waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan barbaarinta hore. Ujeeddadeedu waa in la taageero koritaanka, horumarka iyo waxbarashada ilmaha iyadoo lala kaashanayo waalidiinta. Tarbiyadda, waxbarashada iyo daryeelku dhammaantood waa wada muhiim.

Finland inta badan barbaarinta hore waxaa lagu qabtaa xannanoyinka carruurta. Qaabab kale waxaa ka mid ah xannanada maalinta ee qoyska iyo adeegyada furan ee barbaarinta hore (tusaale, kooxo). Haddii waalidiintu ay shaqo wareeg ah qabtaan, ilmaha waxaa loo heli karaa xannanad kala wareeg ah oo loo furi karo 24/7 haddii loo baahdo.



Picture: RosZie / Pixabay

Bilaabista xannaanada

Ilmuhu wuxuu xannaanada bilaabi karaa marka uu 9 bilood jiro. Booska waa in la codsadaa afar bilood ka hor intaan la bilaabin. Haddii ilmuhu u baahdo boos degdeg ah, la soo xiriir madaxda xannaanada.

Ilmuhu wuxuu booqanayaa xannaanada isagoo la socda waalidiinta ka hor maalinta ugu horreysa ee xannaanada. Tani waxay ka dhigaysaa bilowga xannaanada mid fudud, qoyska ayaana helaya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida xannaanadu u shaqeeyso. Isla markaas shaqaalaha xannaanadu waxay bartaan ilmaha iyo qoyska.

Kharashaadka

Barbaarinta hore waxay qaadaa lacag bille ah. Lacagtu waxay ku xiran tahay inta ilmuhu joogayo, tirada qoyska iyo dakhliga. Lacagta ugu badan waxay ku dhowdahay 300 yuuro. Haddii dakhliga waalidiintu uu hooseeyo, wax lacag ah lama qaado. Macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan lacagaha waxaad ka weydiin kartaa xannaanada.



Picture: Yunus Tug / Unsplash

Xannanada, ilmuhu wuxuu helaa saaxiibo...

Ciyaarta iyo saaxiibadu aad bay ugu muhiimsan yihiin ilmaha. Xannanada waxaa loogu talagalay waqti badan oo cayaar ah. Ciyaartu waxay dhiirrigelisaa carruurta oo waxay siisaa farxad. Isla mar ahaantaas carruurta waxay bartaan xirfado badan. Shaqaalaha xannanadu waxay ka qayb qaataan ciyaaraha carruurta.



Picture: Fabian Centeno / Unsplash

... oo wuxuu baranayaa waxyaabo badan oo cusub

Xannanada, ilmuhu wuxuu ka qayb qaadanayaa hawl badan oo kala duwan wuxuuna baranayaa wax cusub. Taageeridda barashada carruurta waa mid ka mid ah hawlaha ugu muhiimsan ee xannanada. Hadafyada waxbarashadu waa kuwo guud oo ballaaran, ma aha oo keliya xirfad gaar ah. Intaa waxaa dheer maalintii in bannaanka loo baxo, la heeso, lana sameeyo farshaxan iyo gacmo-isku-taag. Carruurta way seexdaan maalintii ama way nastaan muddo gaaban.



Picture: Getty Images / Unsplash

Xannanada carruurta waxay cunaan cunto caafimaad leh oo kala duwan. Waxaa la siiyaa saddexda waqti cunto: quraac, qadada iyo casariye.



Barnaamijka maalinta

Saacadaha furitaanka iyo jadwalka maalintu isku mid kama aha dhammaan xannaanoyinka. Tusaale maalin xannaanada:

6:30 – Xannaanadu way furantaa, ciyaar iyo hawlo kale

8:00 – Quraac (tusaale: boorash, miro, rooti)

8:30 – Bilaabidda maalinta oo wadajir ah

9:00 – Waqti hawleed (tusaale: jimicsi, farshaxan, muusig)

10:00 – Bannaanka u baxid

11:30 – Qado (cunto kulul, salad, rooti)

12:30 – Waqti nasasho (sheeko akhris, muusig, hurdo)



13:00 – Carruurta waaweyn way ciyaarayaan, kuwa yaryarna way seexanayaan

14:00 – Cunto fudud (tusaale: macmacaan, miro, rooti)

14:30 – Ciyaar iyo hawlo kale

15:30 – Bannaanka u baxid iyo guriga loo kala baxid

17:30 – Xannaanadu way xidhantaa



Carruurta waxay xannaanada iman karaan waqtiyo kala duwan, laakiin badanaa ka hor quraacda. Carruurta waxaa la soo kaxeeyaa waqtiyo kala duwan, ha ahaato gudaha ama galabtii oo la aado. Waqtiyada la keenayo iyo la qaadayo carruurta waxaa laga heshiyaa hore oo lala wadaa shaqaalaha xannaanada.

Maalmaha joogitaanka iyo fasaxyada

Aad bay muhiim u tahay in ilmuhu xannaanada si joogto ah u yimaado. Sidoo kale waa wanaagsan tahay in waqtiga imaatinka iyo bixidda isku mid noqdaan maalin kasta. Maalmaha fasaxa ee ilmaha waxaa fiican in laga wada hadlo ka hor shaqaalaha xannaanada. Maalmaha ilmuhu joogo ama maqnaado waa in lagu soo wargeliyaa xannaanada.

Kooxyada carruurta

Cabbirka kooxaha carruurta wuu kala duwanaan karaa. Haddii kooxdu ka kooban tahay carruur ka yar 3 sano jir, carruurta way yaraadaan. Maalintii carruurta waxaa loo qaybiyaa kooxo yaryar marka la ciyaarayo ama la qabanayo hawlo gaar ah.

Kooxda carruurta badanaa waxaa ka shaqeeya saddex qof oo waaweyn. Waxay leeyihiin waxbarasho iyo xirfad kala duwan. Tusaale ahaan:

- Macallinka barbaarinta hore
- Shaqaalaha bulshada ee barbaarinta hore
- Daryeele carruur ee barbaarinta hore



Picture: Getty Images / Unsplash

Intaa waxaa dheer, xannaanada waxaa ka shaqeeya maamulaha xannaanada, macallin khaas ah oo barbaarinta hore ah iyo kaaliyeyaal. Sidoo kale waxaa jooga shaqaale ka shaqeeya nadaafadda iyo qaybinta cuntada. Marka loo baahdo, waxaa lala shaqeeyaa xirfadlayaal kale.

Iskaashi lala yeesho waalidiinta

Wadahadallada maalinlaha ah ee u dhexeeya shaqaalaha xannaanada iyo waalidiinta waa qayb muhiim ah oo ka mid ah iskaashiga. Shaqaaluhu waxay muhiimad siinayaan inay ogaadaan xaaladda qoyska iyo ilmaha. Sidoo kale waalidiintu waxay jeclaanayaan inay maqlaan waxa ilmuhu xannaanada ka sameeyey.



Picture: Volodymyr Hryshchenko / Unsplash

Qorshaha barbaarinta hore ee ilmaha

Ilmo kasta waxaa loo sameeyaa qorshe u gaar ah oo barbaarinta hore oo loo yaqaan vasu. Macallinka xannaanadu wuxuu la heshiinayaa waalidiinta kulan loogu samaynayo qorshaha. Kulanka waxaa suuragal ah in la isticmaalo turjubaan.

Vasu-ga ilmaha waxaa lagu qoraa sida loo taageerayo horumarkiisa, waxbarashadiisa iyo wanaaggiisa guud. Waxaa kale oo lagu qoraa rajada iyo aragtida waalidiinta ee ku saabsan tarbiyadda ilmaha, xooggiisa, baahiyihiisa iyo waxyaabaha xiisaha u leh.



**Euroopan unionin
osarahoittama**

Mashruuca Niitty 2 2023–2026
Wadajir loogu shaqaynayo nolol-maalin
leh oo wanaagsan ee qoysaska soo
galootiga ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku
saabsan mashruuca:
projects.tuni.fi/niitty2

Albaabka macluumaadka qoysaska:
tuni.fi/perheinfo

Buug-yarahan waxaa laga faa'iideystay agabka Wasaaradda
waxbarashada.

Macluumaad dheeraad ah: www.oph.fi

Sawirrada: Unsplash iyo Pixabay (lagala soo degay 24.4.2025)



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**

